**U Diyaar-garowga iyo Wax-kaqabashada Korona Fayraska Cusub (COVID-19) adigoo ah Waalidka ama Qoyska ilmo leh Naafonimo**

Waxaa sameeyay:

FACT Oregon — Empowering families experiencing disability.

OREGON DEPARTMENT OF EDUCATION — Oregon achieves . . . together!

Caalamku wuxuu ka jawaabayaa qalalaasa caafimaad oo aan horay loo arag, Korona Fayraska Cusub ee 2019 (COVID-19). Iyada oo laga jawaabayo qalalaasahan, Gudoomiye (Governor) Kate Brown, waxay dugsiyada u xirtay ardayda Oregon laga bilaabo Isniinta, 16-ka Maarso ilaa Talaadada, 28-da Abriil. In kasta oo xiritaankani uu sababayo caqabado waaweyn, waa habka ugu wanaagsan ee lagu xakamayn kara fayruuska, lagu gaabin heerka isqaadsiinta, laguna ilaalin kara nolosha dadka reer Oregon. Baadqabka, caafimaadka iyo daryeelka ardayda iyo qoysaskooda, iyo bulshooyinka dugsigayaga ayaa ah mudnaantayada ugu sareysa.

**Wax Ku Saabsan Cudurka Korona Fayraska (COVID-19)**

Sida laga soo xigtay Xarunta Xakamaynta Cudurrada (CDC), Korona Fayraska Cusub (COVID-19) waa xanuun neefsasho oo uu sababo fayruus cusub, wuxuuna leeyahay astaamo ay ka mid yihiin qandho, qufac, iyo neefsashada oo yaraato taasi oo la isku arki karo inta u dhaxeeysa labo ilaa 14 maalmood u baylah noqoshada kadib. Ka eeg boggan CDC-da xaashida xaqiiqaha kooban ee COVID-19 wuxuuna boggan CDC-da leeyahay macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ka-hortagga COVID-19.

**Waxa ay waalidiintu u baahan yihiin inay ogaadaan:**

- Wax-kaqabashada fayruuskan ayaa si dhakhso ah isku beddelaysa waana mid aan la hubin, sidaa darteed waxaa dhammaanteen na looga baahan yahay inaan intii karaankeena ah ku dadaalno inaan la socono go'aanada la gaarey si aan u badbaadino bulshooyinkayaga. Go'aanada qaar waxaa lagu gaaraa heer federaalka, qaar waxaa lagu gaaraa heer goboleedka waxaana gaara Gudoomiyaha (Governor) Gobolka ama Waaxda Waxbarashada ee Oregon, qaarna waxaa gaara degmo dugsiyeedka degaankaaga.

  Xiritaanka dugsiga ee hore wuxuu ahaa go'aanka Gudoomiyaha, laakiin go'aano badan (tusaale ahaan, bilaabida, dib u qaadashada maadooyinka, xirida dugsiga oo la kordhiyo , iwm) ayaa ka imaan *kara* degmadaada. Sidaa darteed, xaqiiji inaad ku xirnaato degmadaada si aad ula socoto. Macluumaadka xiriirka ee degmada ayaa laga heli karaa halkan.

  Inta uu dugsiga xiran yahay, dugsiyada dowladu waa inay sii wadaan bixinta waxbarashada kaabiska ah iyo taageerooyinka waxbarasho ilaa intii suurta gal ah, waa inay ku bixiyaan cunnooyinka dugsiga gooba aan la isugu imaanayn, ayna sameeyaan qorshooyin loogu tala galay qabashada howlaha muhiimka ah, oo aan waxbarashada ahayn, oo ay ku jiraan adeegyada cuntada.

- Waaxda Waxbarashada ee Oregon waxay ka shaqeynaysaa inay hagitaan iyo taageero siiso degmo dugsiyeedyada inta aan ka wada gudbeyno xaaladdan, waxayna siisay Su'aalahan Badanaa La Isweeydiiyo degmooyinka. Guud ahaan, in kastoo ilmahaagu uu weli xaq u leeyahay Waxbarasho Dawladeed oo Habboon Bilaashna ah (FAPE), dhammaan ardayda lama siin doono adeegyada

waxbarashada ee gaarka ah inta lagu jiro xiritaankan dugsiga. Su'aalahan Badanaa La Isweeydiiyo ee loogu talagalay Waalidka ayaa leh macluumaad dheeri ah.

- In kasta oo xaaladdani ay lahaan karto dareen go'doomin oo weyn, keligaa ma tihid. Ururo badan, oo uu ku jiro FACT Oregon, ayaa ka shaqeeynaya inay khayraad ku bixiyaan weebsaydyada, aqoon-isweeydaarsyada onlaynka ah, iyo baraha bulshada Liiskan khayraadka ayaa bixinaya macluumaad dheeri ah.